

Iyo toban habeen, Habeennada Dul-xija

Maxaan ku soo dhawaynaynaa maalmahan (*Tobabka Dul-xija*)?

Ibnu Cabbas waxaa laga weriyay inuu yiri, rasuulka ﷺ ayaa yiri: “*Maalmo ma jiraan, camalka wanaagsan Alle looga jacayl badan yahay, maalmahan*” (wuxuu u jeedaa tobanka maalmood). Waxay dhaheen, rasuulkii Allow! Jihaadkana ku daroo, ma iyagaa looga jacayl badan yahay? Markaasuu yiri: “*Jihaadkana ku dar; kolka laga reebo nin naftiisa iyo maalkiisaba jihaad u saaray, kaddibna aan waxba kala soo laaban*”.

Camalka wanaagsanina waxa uu koobsanayaa noocyada cibaadada ee kala duwan, sida: soonka, salaadda, xajka, xuska Alle, Alle-u-takbiirsiga, Quraan-akhriska, in wax lagu bixiyo meelaha wanaagsan iyo wixii la mid ah.

Waxyaabaha sida gaarka ah loo adkeeyay maalmahan waxaa ka mid ah:

- 1) **Soonka**, marka laga reebo maalimka tobanaad. Waxaa laga weriyay qaar ka mid ah xaasaskii rasuulka ﷺ inay tiri: “*Rasuulku ﷺ waxa uu ahaa mid sooma sagaalka maalmood ee Dul-xija*”. Gaar ahaan maalimka Carafo oo soonkiisa lagu dhaafo labo sano denbigood.
- 2) **Xajka**, waana waxa ugu fadliga badan ee la qabto tobanka maalmood. Rasuulkuna ﷺ waxa uu yiri: “*Xajka suubban, maaha abaalkiisu janno mooyee*”.
- 3) **Ulxada**, waana sunne la adkeeyay. Qofkii doona inuu ulxaysto waxa uu ka fogaanayaa in uu timihiisa iyo ciddiyihiisa wax ka gooyo laga bilaabo soo gelitaanka bisha Dul-xija, ilaa uu ka gawracayo ulxadiisa.
- 4) **In la badiyo tahliisha, takbiirta iyo Alle-mahdinta**, habka loo takbiirsanayona waa: “*Allaahu Akbar, Allaahu Akbar, Allaahu Akbar. Laa ilaaha illa-laahu, Allaahu Akbar, Allaahu Akbar, Walillaahil-xamdu*”.